Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JAN-FEB

# 2026

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.192** **Taariikh: 11 Jan, 2026**

**XEERKA: XEERKA DHISMAHA MACHADKA SOOMAALIYEED EE BADAHA**

XRW - BIXIT
14 JAN 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo, (f) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **XW/WDGB/127/25** ee ku taariikheysan **09/12/2025** ee Wasaaradda Dekadaha kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeerkaan uu u leeyahay Ilaalinta & Horumarinta Kheyraadka Badda .

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.1.26** ee **05/01/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Dekadaha & Gaadidka Badda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeerka.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Xeerkaan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAn-006-2026
TAARIIKH 31-01-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud F. JFS

**Mudane, Saalax Axmed Jaamac**
**Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha ahna**
**Ra'iisul Wasaare kuxigeenka Xukuumadda JFS**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIIDKA BADDA

# XEERKA DHISMAHA MACHADKA SOOMAALIYEED EE BADAHA

## *Maritime Institute of Somalia* (MIS)

# TUSMO


**CUTUBKA KOWAAD: QODOBO GUUD .......... 3**

Qod. 1: Magaca Xeerka .......... 3

Qod. 2: Eray Bixin .......... 3

Qod. 3: Ujeeddooyinka Guud ee Machadka .......... 3

**CUTUBKA LABAAD: QAAB-DHISMEEDKA, DABEECADDA IYO ASTAANTA MACHADKA .......... 4**

Qod. 4: Dhismaha iyo Dabeecadda Machadka .......... 4

Qod. 5: Astaanta, Calanka iyo Shabadda Machadka .......... 4

Qod. 6: Hawlaha Machadka .......... 4

Qod. 7: Qaab-dhismeedka Machadka .......... 5

Qod. 8: Golaha Sare ee Machadka .......... 5

Qod. 9: Waajibaadka Golaha Sare ee Machadka .......... 5

Qod. 10: Shuruudaha Agaasimaha Machadka .......... 6

Qod. 11: Magacaabista iyo Xil ka-qaadista Agaasimaha Machadka .......... 6

Qod. 12: Mas'uuliyadaha Agaasimaha Machadka .......... 6

**CUTUBKA SEDEXAAD: QODOBO QUBANE AH .......... 7**

Qod. 13: Miisaaniyadda iyo Ilaha Dhaqaalaha Machadka .......... 7

Qod. 14: Warbixinta Sanadlaha ah .......... 7

Qod. 15: Shaqaalaha & Howlwadeennada Machadka .......... 8

Qod. 16: Kaalinta Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare .......... 8

Qod. 17: Shahaadooyinka iyo Halbeegyada Tacliinta Machadka .......... 8

Qod. 18: Xeer-hoosaadyada Machadka .......... 9

Qod. 19: Dhaqangal .......... 9

## CUTUBKA KOWAAD: QODOBO GUUD

### Qod. 1: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Machadka Soomaaliyeed ee Badaha".

### Qod. 2: Eray Bixin

Ereyada soo socda haddii aan si kale loogu fasirin xeer kale, xeerkan gudihiisa waxaa loola jeedaa macnaha ku hor qoran:

1. **Wasaaradda:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
2. **Machadka:** waxaa loola jeedaa Machadka Soomaaliyeed ee Badaha.
3. **Agaasimaha Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
4. **Agaasimaha:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha.
5. **Wasiirka:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

### Qod. 3: Ujeeddooyinka Guud ee Machadka

1. Kor u qaadista aqoonta mihnadlayaasha Soomaaliyeed ee culuumta badmaaxidda iyo gaadiidka badda.
2. Kobcinta xirfadda iyo aqoonta hawlwadeennada dekadaha Soomaaliyeed.
3. Kaabista hawlaha diyaarinta, soo saarista siyaasadaha, go'aammada, xeerarka la xiriira badaha, dekadaha iyo gaadiidka badda.
4. Horumarinta culuumta badaha, badmaaxnimada, gaadiidka badaha iyo maamulka dekadaha.
5. Hubinta aqoonta iyo xirfadda mihnadlayaasha ay Wasaaradda iyo hay'adaheedu siinayaan rukhasadda ama ay la geleyso heshiisyada shaqo.

## CUTUBKA LABAAD: QAAB-DHISMEEDKA, DABEECADDA IYO ASTAANTA MACHADKA

### Qod. 4: Dhismaha iyo Dabeecadda Machadka

1. Xeerkan waxa uu dhisayaa “Machadka Soomaaliyeed ee Badaha”, af Carabigana ku noqonaya “المعهـد الصـــومــالي للبحــار”, halka af Ingiriisna uu ku noqonayo “Maritime Institute of Somalia” loona soo gaabiyo (MIS).
2. Machadku waa xarun tacliin iyo tababar farsamo oo hoos yimaada Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
3. Xarunta dhexe ee Machadka waa Muqdisho, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka.
4. Afka rasmiga ah ee Machadka waa Af-Soomaali, hase yeeshee, daraasaadka iyo tababarrada waxaa lagu bixin karaa afafka Carabiga iyo Ingiriisiga.

### Qod. 5: Astaanta, Calanka iyo Shabadda Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah oo ka kooban: Markab dul maraya biyo hirar ah, oo uu hoos yaallo bug furan, laguna weegaaray magaca Machadka oo Af-Soomaali iyo Carabi ku qoran sida ku cad lifaaqa xeerka.
2. Calanka Machadku waxa uu noqonayaan Leydi cad oo dhexda ku leh astaanta Machadka.
3. Shabadaha Machadka waxaa nidaaminaayo xeer-hoosaadka maamulka Machadka waase in shabbad walba oo uu Machadku isticmaalayo ay ka dhex muuqataa astaanta machadka.

### Qod. 6: Hawlaha Machadka

1. Bixinta barnaamijyo tacliin sare oo la xiriira culuumta badaha, badmaaxidda, gaadiidka badda iyo maamulka dekadaha oo waafaqsan hannaanka tacliinta sare ee dalka.
2. Bixinta tababarrada gaarka ah iyo koorsooyinka gaagaaban ee xirfadeed;
3. Soo saarista cilmibaarisyo kaabaya sameynta iyo fulinta siyaasadaha qaran ee la xiriira hawlaha Wasaaradda.
4. Dhisidda iyo dhaqangelinta hannaanka hubinta aqoonta iyo xirfadda mihnadlayaasha ku shaqada leh hawlaha Wasaaradda iyo hay’adaheeda.

5. Soo tarjumidda iyo Soomaaliyeynta culuumta iyo adeegsiga teknoloojiyada la xiriirta aqoonta badmaaxidda, gaadiidka badda, maamulka dekadaha iyo xeerarka caalamiga ah ee la xiriira;
6. Maareynta xiriirrada iyo iskaashiga caalamiga ah ee khuseeya akademiyadaha machadyada, jaamacadaha iyo guud ahaan xarumaha ay isku shaqada yihiin ee caalamka

## Qod. 7: Qaab-dhismeedka Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa qeybo maamul oo fuliya hawlaha Machadka.
2. Faahfaahinta qaab-dhismeedka Machadka waxaa qeexaya xeer-hoosaad uu soo saarayo golaha sare ee Machadka.

## Qod. 8: Golaha Sare ee Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa Gole Sare oo uu Gudoomiye u yahay Wasiirka Wasaaradda, kana kooban sagaal (9) xubnood oo kala ah:

    a) Wasiirka Wasaaradda (Gudoomiye);
    b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda (Xubin);
    c) Agaasimaha Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda;
    d) Agaasimaha Machadka (Xubin); iyo
    e) 5 (Shan) xeel-dheereyaal oo aqoon durugsan u leh hawlaha Machadka oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda.

## Qod. 9: Waajibaadka Golaha Sare ee Machadka

1. Waajibaadka Golaha Sare ee Machadka waxa ay yihiin:

    a) Jaan-goynta siyaasadaha maamul ee Machadka iyo qorshayaashiisa;
    b) Abuurista iyo go'aan ka gaarista barnaamijyada kala duwan ee Machadka;
    c) Soo-saarista xeerhoosaadyada Machadka;
    d) Meelmarinta natiijooyinka imtixaannada Machadka;
    e) Bixinta shahaadooyinka iyo darajooyinka cilmiyeed ee Machadka; iyo
    f) Go'aan ka gaarista arrimaha masiiriga ah ee Machadka,

2. Golaha Sare ee Machadka waxa uu yeelanayaa xeer-hoosaad u gaar ah oo faahfaahinaya shaqooyinkiisa.

### Qod. 10: Shuruudaha Agaasimaha Machadka

Qofka loo magacaabayo xilka agaasimaha Machadka waa in uu buuxiya shuruudaha soo socda:

a) In aysan da'diisu ka yareyn 35 sano.
b) Inuu shahaadada labaad ka haystaa Jaamacad laga aqoonsan yahay JFS;
c) Inuu leeyahay khibrad Shaqo ugu yaraan 5 sano ah, si fiicanna u yaqaan afafka Soomaaliga, iyo English-ka ama Carabiga;
d) In aysan maxkamad si kama dambaysa ah ugu xukumin ciqaab ka reebaysa qabashada shaqo guud.

### Qod. 11: Magacaabista iyo Xil ka-qaadista Agaasimaha Machadka

1. Wasiirka ayaa u magacaabaya qof ku habboon Agaasimaha Machadka.
2. Mudo-xileedka Agaasimaha Machadka waa 5 (shan) sano oo hal mar keliya la cusubooneysiin karo.
3. Aaasimaha Machadka waxaa xilka ka qaadi karo shaqadana ka joojin kara Wasiirka Wasaaradda oo kaliya.

### Qod. 12: Mas'uuliyadaha Agaasimaha Machadka

a) Maareynta hawlaha guud ee Machadka iyo hirgelinta ujeeddooyinkiisa;
b) Diyaarinta qorshayaasha barnaamijyada tacliinta, tababarka, cilmi-baarista iyo guud ahaan hawlaha Machadka.
c) Korjoogteynta shaqada qeybaha Machadka iyo hawlwadeennadiisa,
d) Soojeedinta magcaabista xilalka Machadka ee uu Wasiirku magacaabo,
e) Waxa uu si buuxda u matalaa Machadka, waxa uuna magaciisa ku geli karaa heshiisyo shaqo iyo iskaashiyo marka uu helo oggolaanshaha Wasiirka ama ay xeerhoosaadyada Machadku u fasaxayaan.
f) Soo gudbinta warbixinta sanadlaha ah iyo xisaabaadka Machadka.

## CUTUBKA SEDEXAAD: QODOBO QUBANE AH

### Qod. 13: Miisaaniyadda iyo Ilaha Dhaqaalaha Machadka

1. Machadku waxa uu miisaaniyadda guud ee Wasaaradda ku dhex yeelanayaa madax-miisaaniyadeed u gaar ah .
2. Machadka waxaa u furan in uu sameeyo dakhli maaliyeed, sida lacagaha ka soo xaroodo:
   a) khidmadda waxbarashada ee laga qaado ardayda;
   b) Adeegyada tababarrda iyo cilmi-baarista;
   c) Abaal-marinnada iyo hal-abuurka cilmiyeed;
   d) Faafinnada Machadka iyo wax-soo-saarkiisa cilmiyeed;
   e) Adeegyada la-talinta iyo gacansiinta shirkadaha gaarka ah ee daneeya hawlaha Machadka; iyo
   f) Guud ahaan hawlaha Machadka ee dakhli laga sameyn karo.

3. Dakhliga Machadka waxaa la waafajinayaa Shuruucda nidaamisa Maaliyadda guud ee Dalka.
4. Waxaa u furan Agaasimaha Machadka ama cidda uu wakiisho in heshiis shaqo oo aan joogta aheyn uu la galo macalimmiin, tababarayaal, cilmibaarayaal iyo hawlwadeenno aan shaqaale rasmi ah aheyn, si waafaqsan qorshaha Machadka ee uu meelmariyay golaha sare ee Machadku iyo xeerhoosaadyada Machadka.
5. Machadka waxa uu yeelanayaa xisaab-bankiyeed rasmi ah oo lagu qabto nooc walba oo dakhli ah, si waafaqsan nidaamka dakhli uruurinta dalka.
6. Hannaanka maaliyadeed ee u gaarka ah Machadka waxaa nidaaminaya xeerhoosaad uu soo saaro Golaha Sare ee Machadka si waafaqsan shuruucda maaliyadeed ee dalka.

### Qod. 14: Warbixinta Sanadlaha ah

1. Sanad-maaliyadeedka Machadka wuxuu ka bilaabanayaa 1$^{da}$ Janaayo wuxuna ku dhammaadaa 31da diseembar sanad kasta.
2. Machadku wuxuu warbixinta xisaab-xirka sanad-maaliyadeedka u gudbinayaa Wasiirka sanad kasta.

### Qod. 15: Shaqaalaha & Howlwadeennada Machadka

1. Shaqaalaha Machadka waxa ay isugu jiri karaan Shaqaale Rayid ah oo ka tirsan wasaaradda iyo howlwadeenno noqon kara Soomaali iyo ajanabi oo Machadka kula shaqeeya heshiisyo shaqo oo gaar ah ama gacansiin.
2. Maamulka arrimaha shaqaalaha iyo howlwadeennada Machadka waxaa la waafajinayaa shuurcda dhaqangalka ah Dalka ee khuseysa arimahan.

### Qod. 16: Kaalinta Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare

Wasaaradda Waxbarashada Hiddah & Tacliinta Sare waxa ay Machadka ku yeelaneysa kaalinta soo socota:

1. Hubinta iyo meelmarinta barnaamijyada Tacliinta Sare ee Machadka.
2. Korjoogteynta hannaanka waxbarasho iyo qiimeyn ee Machadka.
3. Tasdiiqinta shahaadooyinka Machadka ee ku soo baxay si waafaqsan xeerka Machadka.
4. Jiheynta Machadka ee la xiriirta siyaasadda guud ee waxbarashada iyo tacliinta Sare ee Dalka.

### Qod. 17: Shahaadooyinka iyo Halbeegyada Tacliinta Machadka

1. Waxbarashada, tababarrada, hannaanka qiimeyta iyo shahaadooyinka uu bixiyo Machadka waxaa la waafajinayaa:
   a) Axdiyada iyo hagayaasha caalamiga ah ee halbeegyada tacliinta, tababarka, qiimeynta iyo shahaadasiinta khuseysa culuumta badaha iyo badmaaxnimada.
   b) Xeerarka, siyaasadaha iyo go’aannada maamul ee ku shaqada leh howlaha Machadka ee waafaqsan inti suuragal ah axdiyada iyo hagayaasha caalamiga ah.

## Qod. 18: Xeer-hoosaadyada Machadka

1. Golaha Sare ee Machadka ayaa soo saaraya dhammaam xeer-hoosaadyada Machadka.
2. Dhammaan xeer-hoosaadyada Machadka waa in la waafajiyo xeerkan iyo shuruucda kale ee dalka.

## Qod. 19: Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golaha-wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna xeer ku soo saaro Ra'iisul-wasaaraha JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.